



Bocorkii rogrogmayey

– sheeko ka timid Iiraan

Det rullende gresskaret

- En fortelling fra Iran

Beribaa waxaa jiray marwo waayeel ah oo ku noolayd tuulo aad u yar oo ku dhinac taalay keyn khatar ah oo ku taalay liraan.

Iyadu waxa ay dhashay gabar xaas ah oo ku noolayd dhinaca kale ee keynta. Gabadheedii ayey tebtay oo maalin ayey go'aansatay in ay aado oo ay soo booqato maalinta Ciidda.

Det var en gang en gammel dame som bodde i en bitte liten landsby ved siden av en stor og farlig skog i Iran. Hun hadde en datter som var gift og bodde på den andre siden av skogen. Hun savnet datteren sin og en dag bestemte hun seg for å dra og besøke henne til Eid.



Si ay halkan u timaado, waa in ay soo dhaaftaa keyntii khatarta ahayd. Waxa ay diyaarsatay boorso cunto ah, waxay xiratay kabo iyo xijaabkeedii dheeraa oo madowga lagu ubaxeeyey, oo goobtii ayey ka tagtay.

Waa ay socotay oo socotay, ilaa ay aad ugu miriqday gudaha keynta.

Intii ay socotay waxay ku heesaysay:

Alå doxtar balå qorbunatam man, be ghorbat rafti o heirunatam man.

(Gabadheydii qaaliga ahaydeey, waan ku jeclahay, waxaad u dhooftay dhul aan la aqoon oo waan ku tebayaa.)

For å komme dit, måtte hun krysse den farlige skogen. Hun gjorde i stand en skreppe med mat, tok på seg sko og sin lange svarte blomstrede chador, og dro av sted. Hun gikk og gikk, helt til hun forsvant dypt inni skogen. Mens hun gikk sang hun:

Alå doxtar balå qorbunatam man, be ghorbat rafti o heirunatam man.

(Min kjære datter jeg elsker deg, du har dratt til et fremmed sted og jeg leng-ter etter deg.)



Si lama filaan ah ayaa waxaa marwadii waayeelka ahayd uga soo hor baxday yeey, halkeedii ayey isku adkaysay.

«Nam, nam, nam, Cunto macaanaa,» ayey tiri yeeydii oo hungurinimo la dhareertay.

Marwadii waayeelka ahayd waa is ururisay oo tiri: «Ma ihi cunto macaan, caato ayaan ahay oo leh calool dhuuban. Jirkeygu waxa uu leeyahay baruur yar, haddii aad I cuntid ma dhergaysid..» Afka yeeydu gebi ahaanba waa qalalay oo waxa ay tiri: «Hadaba maxaan sameeyaa, aad ayaan u baahanahaye?» Marwadii waayeelka ahayd waxa ay ku jawaabtay: «I dhaaf aan aado gabadhayda maalinta Ciidda oo aan soo cuno bariis iyo hilib ari. Markaan soo cayilo oo soo dhergo, ayaan soo noqon anoo ah sida cunto macaan, taas oo lagu cuni karo hal saxan.»

Yeeydii waxa ay u qaadatay in ay taasi tahay fikrad fiican oo waxa ay weydiisatay marwadii waayeelka ahayd in ay dhaqsato, sababtoo ah yeeydu aad ayey u baahanayd! Islaantii beertii ayey ka degdegtay.

Plutselig var det en ulv som dukket opp foran den gamle damen, og hun stivnet til.

«Nam, nam, nam, for et deilig måltid,» sa ulven og siklet grådig.

Den gamle damen tok seg sammen og sa: «Jeg er da ikke deilig mat, jeg er tynn med mage flat. Kroppen min har lite fett, spiser du meg, blir du ikke mett.»

Ulven ble helt tørr i munnen og sa: «Hva skal jeg gjøre da, jeg er så sulten?»

Og gamle damen svarte: «La meg dra til min datter til Eid og spise ris med lammespyd. Når jeg har blitt tjukk og mett, kommer jeg som en deilig rett, som kan spises på ett brett.»

Det syntes ulven var en god idé og han ba den gamle dama om å skynde seg, for han var kjempesulten! Hun skyndte seg av gårde.



Si lama filaan ah ayaa waxaa yimid shabeel oo ka soo booday geed horteeda ku yaalay. Shabeelkii wuxuu soo muujiyey ciddiyihiisii soofaysnaa oo wuxuu yiri: «Nam, nam, nam, Cunto macaanaa!» Mar kale ayey marwadii waayeelka ahayd ku jawaabtay: «Ma ihi cunto macaan, caato ayaan ahay oo leh calool dhuuban. Jirkeygu waxa uu leeyahay baruur yar, haddii aad I cuntid ma dhergaysid.» Ka dib ciddiyihii shabeelka ayaa ku qarsoomay cagaha oo wuxuu yiri: «Hadaba maxaan sameeyaa, aad ayaan u baahanahaye?» Markale, Marwadii waayeelka ahayd waxa ay ku jawaabtay: «I dhaaf aan aado gabadhayda maalinta Ciidda oo aan soo cuno bariis iyo hilib ari. Markaan soo cayilo oo soo dhergo, ayaan soo noqon anigoo ah sida cunto macaan, taas oo lagu cuni karo hal saxan.» Shabeelkii wuu la qaatay taas oo waxa uu weydiisatay marwadii waayeelka ahayd in ay dhaqso u soo laabato, sababtoo ah aad ayuu u baahnaa. Naagtii waayeelka ahayd goobtii ayey ka dhaqsatay.

Plutselig kom det en tiger og hoppet ned fra et tre foran henne. Tigeren viste fram de skarpe klørne sine og sa: «*Nam, nam, nam, for et deilig måltid!*». Igjen svarte gamle dama: «*Jeg er da ikke deilig mat, jeg er tynn med mage flat. Kroppen min har lite fett. Spiser du meg, blir du ikke mett.*»

Da forsvant tigerens klør inn i potene og han sa: «*Hva skal jeg gjøre da? Jeg er så sulten!*»

Igjen, svarte gamle dama: «*La meg dra til min datter til Eid, og spise ris med lammespyd. Når jeg har blitt tjukk og mett, kommer jeg som en deilig rett, som kan spises på ett brett.*»

Tigeren gikk med på det og ba henne skynde seg tilbake, fordi han var veldig sulten. Den gamle konen skyndte seg av sted.



Si la filaan ah waaba libaax taagan oo si toos ah wejiga marwadii waayeelka ahayd ku hor guuxaya, iyada oo dhogortisii dhinac kasta si adag u istaagtay. «Sug! Sharaf ayey ii tahay in uu i cuno libaax- boqorka keynta! Laakiin boqorku waxa uu mudan yahay cunto fiican,» ayey tiri marwadii waayeelka ahayd oo sii waday: «Ma ihi cunto macaan, caato ayaan ahay oo leh calool dhuuban. Jirkeygu waxa uu leeyahay baruur yar, haddii aad I cuntid ma dhergaysid.»

Markii uu maqlay libaaxii warkaas, dhogortii ayaa ka degtay madaxiisa oo wuxuu yiri:

«Maxaan sameeyaa? Hal usbuuc waxba ma cunin!» Sida caadiga ah marwadii waayeelka ahayd waxay ku jawaabtay: «*Ma ihi cunto macaan, caato ayaan ahay oo leh calool dhuuban. Jirkeygu waxa uu leeyahay baruur yar, haddii aad I cuntid ma dhergaysid.*»

Oo libaaxii, oo u qaatay in taasi tahay fikrad wanaagsan, wuxuu balanqaaday inuu sugo ilaa ay ka soo laabato.

Plutselig var det en løve som stod og brølte rett i ansiktet på den gamle dama, mens manken hans strittet til alle kanter.

«Vent! Det er en ære for meg å bli spist av løven - skogens konge! Men kongen fortjener da et bedre måltid,» sa den gamle dama og fortsatte:

«Jeg er da ikke deilig mat, jeg er tynn med mage flat. Kroppen min har lite fett, spiser du meg, blir du ikke mett.»

Da løven hørte dette, falt manken slapt rundt hodet hans og han sa:

«Hva skal jeg gjøre? Jeg har ikke spist på en uke!»

Som vanlig svarte gamle dama: «Jeg er da ikke deilig mat, jeg er tynn med mage flat. Kroppen min har lite fett. Spiser du meg, blir du ikke mett.» Og løven, som syntes dette var en god idé, lovte å vente til hun var tilbake.



Markii ay noqotay mugdi, ugu dambeyn marwadii waayeelka ahayd waxa ay timid gurigii gabadheeda. Aad ayey ugu faraxday in ay aragto gabadheedii oo waa ilowday wax kasta oo jidka ka soo dhacay. Waxa ay la joogtay gabadheedii toddobo maalmood iyo toddobo habeen oo waxa ay cuntay cunto badan oo macaan.

Ka dib waxaa timid maalintii ay qaadan lahayd macsalaamaynta. Si lama filaan ah ayey u soo xusuusatay dhammaan xayawaanadii khatarta ahaa ee ku sugayey jidkii dheeraa kuwaas oo doonayey in ay iyada cunaan, oo waxa ay gabadheedii u sheegtay arintaas. Waa ay fariisteen oo waxa ay bilaabeen in ay fikirnaan.

Da det hadde blitt mørk, kom den gamle dama endelig fram til datteren sitt hus. Hun ble så glad av å se datteren sin at hun glemte alt som hadde skjedd på veien. Hun ble hos sin datter i syv dager og syv netter og spiste masse god mat. Så kom dagen da hun skulle ta farvel. Plutselig husket hun alle de farlige dyrene som ventet på henne langs veien og ville spise henne, og fortalte dattera si om dette. De satt seg ned og begynte å tenke.



Si lama filaan ah ayey fikraddan u heleen: Waxa ay aadeen suuqa oo waxa ay soo iibsadeen bocor oo gurigga u soo qaateen. Dusha sare ah ayey jareen dabool. Sidoo kale waxa ay soo qaateen qaaddo, fargeeto, yaambo iyo badiil, oo waxay qodeen wixii gudaha ku jiray. Waa ay qodeen oo qodeen, ilaa ay gudaha bocorkii ay ka noqoto qol banaan.

Plutselig fikk den idé: De dro til basaren og kjøpte et stort gresskar og tok det med seg hjem. De skar ut et lokk ut av toppen. Også tok de fram skje, gaffel, hakke og spade, og gravde ut innholdet. De gravde og gravde og gravde, helt til det ble et tomrom inni gresskaret. Så tok den gamle damen skreppen sin og hoppet inni gresskaret.



Ka dib marwadii waayeelka ahayd waxa ay soo qaadatay boorsadeedii oo waxa ay gudaha ugu booday bocorkii. Gabadhii ayaa saartay daboolkii. Si wadajir ah iyada iyo ninkeedii iyo dadkii deganaa tuulada ayaa bocorkii ka taraarixiyey goobtii.

Datteren la på lokket. Sammen med mannen sin og de andre i landsbyen rullet de gresskaret av. sted Gresskaret rullet og rullet og rullet og forsvant dypt inni skogen.



Bocorkii waa rogmaday oo rogmaday oo rogmaday oo wuxuu ku qarsoomay gudaha keyntii. Si lama filaan ayuu madaxii marwadii waayeelka ahayd ugu dhacay derbiga bocorka. Wuxuu ahaa libaaxii waxa lugtiisa ku istaajiyey bocorkii. Libaaxii wuxuu arkay bocorkii oo weydiiyey:

«Bocorka rogrogmanayoow, ii sheeg: waddadaada ma ku soo aragtay marwo buuran?»

«Maya Wallaahi, halkan iga dilindilee,» ayey ku jawaabtay marwadii waayeelka ahayd oo ku dhexjirtay bocorka. Oo libaaxii ayaa haraantiyey oo bocorkiina goobii ayuu si dhakhso ah uga sii dilindiloobay.

Plutselig traff hodet til den gamle dama gresskarveggen. Det var løven som hadde stanset gresskaret med den ene foten sin. Løven så på gresskaret og spurte:

«Rullende gresskar, fortell meg: Har du sett en fet dame på din vei?»

«Nei walla, rull meg, trill meg, herifra,» svarte den gamle damen inni gresskaret.

Og løven sparket og rullet gresskaret fort av sted.



«Dhag!» Markan waa shabeelkii oo istaajiyey bocorkii. Shabeelkii ayaa weydiiyey:

«Bocorka rogrogmanayoow, ii sheeg: Jidkaaga ma ku soo aragtay marwo buuran?»

«Maya Wallaahi, halkan iga dilindilee, iga rogrog» ayuu maqlay bocorkii oo leh, ka dib bocorkii ayuu goobtii ka sii dilindileeyey.

«Dunk!» Denne gangen var det tigreren som hadde stoppet gresskaret. Tigreren spurte:

«*Rullende gresskar, fortell meg: Har du sett en fet dame på din vei?*»

«*Nei walla, rull meg, trill meg, herifra,*» hørte han gresskaret si, så han rullet gresskaret av sted.



«Dhag!» Markale ayuu madaxii marwadii waayeelka ahayd ku dhacay derbiga bocorka. Hadda waa yeeydii oo sankeeda ku joojisay bocorkii. Yeeydii ayaa ursatay bocorkii oo weydiisay:

«Bocorka rogrogmanayoow, ii sheeg: Jidkaaga ma ku soo aragtay marwo buuran?»

«Maya Wallaahi, halkan iga dilindilee, rogrog» ayuu yiri bocorkii.

«Dunk!» Igjen traff hodet til gamle dama gresskarveggen. Nå var det ulven som hadde stanset gresskaret med snuten sin.

Ulven sniffet på gresskaret og spurte:

«Rullende gresskar, fortell meg: Har du sett en fet dame på din vei?»

«Nei walla, rull meg, trill meg, herifra,» sa gresskaret.

Men ulven kjente igjen stemmen til den gamle dama. Med de skarpe tennene sine tok han opp lokket og hoppet inni gresskaret. Men den gamle dama hadde laget et lokk på den andre siden av gresskaret også. Hun åpnet lokket og hoppet ut fra denne siden. Hun var rask og la lokket tilbake. Dermed fikk ulven lokket midt på snuten. Så skyndte hun seg til toppen av gresskaret og la på det lokket også. Nå var ulven innestengt i gresskaret.



Laakiin waxa ay yeeydii dib ka garatay codka marwadii waayeelka ahayd. Ilkihiisii mudaca ahaa ayuu ku soo qabtay daboolkii oo wuxuu gudaha ugu booday bocorkii. Laakiin marwadii waayeelka ahay waxa ay dabool dhinaca kale uga sameysay bocorkii oo dhinicii kale ayey ka booday. Aad ayey u degdegtay oo daboolkiina ku celisay. Hadana waxa ay u dhaqsatay dhinicii sare ee bocorka oo sidoo kale daboolkii saartay. Hadda yeeydii waxa ay ku xirantay gudaha bocorkii.

Marwadan waayeelka ah, taas oo cuntay baruur oo xoogga lahayd, awoodeedii oo dhan ayey isku keentay oo waxa ay goobta ka dilindilaysay bocorkii oo uu dhexda uga jirto yeeydii. Bocorkii waa rogrogmaday oo rogrogmaday, oo dhamaadkii waxa uu ku dhacay doox dheer oo mugdi ah.

Iyada oo qanacsan oo faraxsan ayey marwadii waayeelka ahayd aaday gurigii oo ay shaah yar sameysatay.

Sheekadii sidaas ayey ku dhamaatay.

Den gamle dama, som hadde spist seg fet og sterk, samlet alle sine krefter og trillet gresskaret av sted, med ulven inni. Gresskaret rullet og rullet, og falt til slutt ned i en dyp, mørk dal. Fornøyd og glad dro den gamle damen hjem og lagde litt te til seg selv.

Snipp snapp snute, så var eventyret ute.





Illustratør: Svetlana Voronkova

Se flere fortellinger på morsmal.no